



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Golaha Shacabka**

***QARAAR BARLAMANI AH***

***(RESOLUTION)***

**GO'AAN GOLAHA SHACABKA OO LA XIRIIRA FUDUDEYNTA  
AQOONSIGA QOFKA IYO BAASABOORKA**

**Muqdisho, 8<sup>dii</sup> Abriil 2014**

## **Golaha Shacabka**

**Markuu arkay** Qodobka 69aad ee dastuurka JFS oo qeexaya Awoodaha Golaha shacabka ee Baarlamaanka Federaalka.

**Markuu arkay** Qodobka 63aad faqradiisa 1aad oo sheegaysa ‘Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalku wuxuu matilaa dhammaan shacabka Soomaaliya’.

**Markuu arkay** Qodobka 54 faqradiia (c) oo qeexayo arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka oo ay awoodeedda iyo mas’uuliyadeeda yeelanayso Xukuumadda Federaalka .

**Markuu arkay** Qodobka 8aad faqradiisa labaad oo qeexaya in Jinsiyadda Soomaaliyeed *“tahay mid qur ah, iyadoo uu Golaha Shacabku ee Dawladda Federaalka Soomaaliyeed sharci gaar ah ku xaddidayo sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo”*.

**Markuu arkay** Qodobka 21aad faqradiisa labaad oo u qeexaysa in *“Muwaaddin kasta uu xaq u leeyahay inuu helo Baasaboor”*.

**Markuu arkay** cabashooyinka ka soo yeeraya shacabka Soomaaliyeed ee ku aaddan caqabadaha helitaanka kaarka aqoonsiga qofka oo haatan laga bixiyo degmo kaliya oo ku taala caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho.

**Markuu arkay** caqabadda baaxadda leh ee ay shuruudda aqoonsigu ku soo kordhisay helitaanka Baasaboorka muwaadiniintu xaqqa u leeyihiin sida uu qabo qodobka 21aad ee Dastuurka.

Markuu arkay Qodobka 123 faqradiisa 6aad Bankiga Dhexe ee Federaalka waa bankiga keydka Qaranka.

**Wuxuu: Kalfadhiga 4aad kulankiisa 8aad ee taariikhda 8/4/2014 uu guddoonsaday qaraarkan:**

### **Qodobka 1aad**

In helitaanka Baasaboorka Soomaaliyeed yahay xaq uu muwaadinka Soomaaliyeed leeyahay isla markaasna ay waajib ku tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya inay u fududeyso muwaadinka siduu u heli lahaa Baasaboor.

### **Qodobka 2aad**

In shuruudda cusub ee baasaboor helidda ku xiraysa inuu muwaadinku haysto aqoonsiga cusub ay shacabka Soomaaliyeed ku keentay culeys iyo caqabado baaxad weyn oo saameeyey noloshooda dhaqan-dhaqaale sida ganacsiga,

waxbarashada, caafimaadka, isu-socodka, daryeelka qoysaskooda, iyadoo xadgudub ku ah xuquuqda aasaasiga ah ee qofka gaar ahaan qodobada 21aad, 24aad, 27aad, 28aad, 29aad iyo 30aad Dastuurka.

### **Qodobka 3aad**

Sida ku cad Qodobka 99aad faqradiisa (A) ee Dastuurka Golaha fulinta ayaa leh dejinta iyo fulinta siyaasadda guud ee Dawladda, sida darteedna ay u soo gudbiso Baarlamaanka sida ugu dhaqsiiyaha badan Sharciga iyo qaabka Baasaboorka cusub, lana joojiyo tariifooyiinka iyo lacagaha aan sharciga aheyn sida kaararka Aqoonsiga (National ID) ee hadda la qaado inta sharci Baarlamaan ka soo saarayo.

### **Qodobka 4aad**

In si toos ah loo hakiyo kaararka aqoonsiga (la joojiyo) ilaa laga hirgilinaayo sharciyeyntiisa iyo in muwaadinka deegaankiisa ka heli karo warqadaha aqoonsiga jinsiyadda ee loo baahan yahay, iyadoo la xurmeenayo Qodobka 50aad ee Dastuurka si loo adkeeyo dareenka midnimadda Qaran loona wada helo adeeg bulshadeed hufan oo ay u siman yihiin dhammaan deegaanada dalka, lana jaangooyo qiimo isku mid ah oo ay awoodaan Shacabka Soomaaliyeed”.

### **Qodobka 5aad**

In Guddoonka Baarlamaanka magacaabo Guddi Baarlamaan oo waajibaadkiisu yahay:

- a) Daba galka fulinta Qaraarkan.
- b) Daba galka qaabka wada shaqaynta ee shirkadaha haysta kunturaada samaynta warqaha aqoonsiga iyo Xukuumadda.
- c) Daba galka dhaqaalaha looga qaaday kaarka aqoonsiga Shacabka Soomaaliyeed iyo meesha lagu baxsho.

### **DHAMAAAD**

\*\*\*\*\*